



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Oktoobar 2007

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah,

Sannadkan muhimada aad waxbarashada ilmihiiina guriga ku siiseen waad ku mahadsan tihiin. Waxaan kale oo aan si aad ah idiin ka mahadcelineyaa aaminka aad maalin kasta u muujiseen dugsiyadeenna iyo waxbarashadda degmada ee ilmihiiina u adeegta. Waxaan jeclahay inaan ogaado in ilmihinnu waxbarashada guul ka gaadho, idinkuna aad dugsiyadeenna ku qanacsan tihiin.

Sidii aan bishii horeba idiin ku sheegnay, baadhitaankii waalidka San Diego Unified School District su'aalaha ku weydiinayeen waxay sheegeen in ka badan boqolkiiba 90 ku qiimeeyeen inay sareyso nabadgelyada ilmaha ee dugsiga, nadaafada, ixtiraamka waalidka, sida sinnaanta ah ee ilmaha loola dhaqmo, iyo waxyaabo kale oo muhim ah oo aan ku wanaagsan nahay. Boqolkiiba siddeetan iyo siddeed waxay waalidiintu ku qanceen guulaha waxabarashada ee ilmuhu sameynayo, isla mar ahaantaasna, marka aad na caawisidna guulaha aan gaadheyno kuwii hore wey ka sii badaneyaan. Sannad-dugsiyeedkan waxaan qeybtayada ku dadaaleynaa inaan sii kordhineyo adeegyada aan dugsiyada u fidin jirey.

Waxaan kaaga mahadcelineynaa inaad tahay macallinka koowaad ee ugu muhiimsan ee ilmahaaga. Waxaad ilmahaaga fursad u siin kartaa inaad siiso meel deggan oo nal wanaagsan leh oo uu wax ku akhristo, shaqada guriga loogu soo direy ku qabto, waxna ku qorto. Waxaa wanaagsan inaad telefishinka demiso wakhtiyada shaqada guriga uu ilmuhu ka shaqeynayo, isla mar ahaantaasna, aad xadidid wakhtiga telefishinka la daawaneyo. Ardeyda wakhtiga yar daawata telefishinka ayaa waxbarashadda kaga wanaagsanaaysa ardeyda laba saac in ka badan maalin kasta TV daawata. Waxaa ka habboon in wakhtigaas aad ilmahaaga wada akhridaan buugaag xiiso leh, maqaalo, sheekooyin, dhegeysiga ilmahaaga sida uu wax u akhrineyo, iyo inaad ka sheekeysataan waxyaabihii la akhriyey. Dhacdooyinkaasu waxay ina tusineyaan sida akhrisku uu muhim u yahay.

Macallinka ilmahaaga wax u dhiga inaad baratid oo aad wada xidhiidhaan waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu wanaagsan ee aad waxabarashadda ilmaahaga ku ogaan kartid. Habeenka ku soo laabashada dugsiga ee Ururka Macallimiinta iyo Waalidiinta (PTA) ayaa ah fursad wanaagsan oo aad macallinka ilmahaaga wax u dhiga kula kulmi kartid. Fadlan waxaad wakhti yar u hurtaa inaad macallinka la kulantid, si aad u qaadatid koorsada waxbarasho ee sannadkaas ilmahaaga loo dhigeyo. Waxaan kale oo aan kugu dhiirigelineyaa inaad sannad-dugsiyeedkan ka qeyb qaadatid oo aad ku biirtid ururka PTA. Waalidiinta ka hawlgala dhacdooyinka dugsiga ka dhacaya waxay astaan u tahay faa'iidada iyo wanaaga ay waxbarashaddu leedahay..

Daraasaad la sameeyey ayaa waxaa lagu ogaadey ilmaha sida joogtada ah waalid meel wax kula cuna inay waxbarashadda kaga wanaagsan yihiin kuwa kale. Arrintaas waxaa sabab u ah wada sheekeysiga miiska qadada ku dhex mareya. Carruurteennu maanta ayey dugsiyada si wacan wax ugu bartaan. Arrintaas inay kaala hadlaan ku soo dhawee.

Bisha Oktoober ha idiin wanaagsanaato!

Si daacadnimo ah,

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada
Somali version: 10.Oct07 PTALtr